

Qofka magangalyoddoonka ahoow: Waxaad waraysiga kaga qaybgalaysaa wadaxiriirka dhanka fiidiyowga ah, adiga oo jooga Waaxda heynta kummeelgaarka ah




Waraysiga lagu qaadaayo fiidiyowga waxaa lola jeedaa, in qofka shaqaalaha Hoggaanka Socdaalka ee waraysiga kaa qaadaaya uu joogo Xarunta Hoggaanka Socdaalka, adiguna aad waraysiga dhanka fiidiyowga kaga qaybqaadanayso adigoo jooga Waaxda haynta kummeelgaarka ah. Waxaan adiga kuu qabannay waraysiga dartiis, meeshii lagugu waraysan lahaa iyo qalabkii loo bahnaaba.

Waraysiga lagu qaadaayo dhanka fiidiyowga ah, wax saamayn ah kuma yeelanaayo waxyaabaha waraysigu uu ka kooban yahay



Waraysiga waa mid isku mid ah, haddii lagaaga qaado dhanka fiidiyowga iyo haddii qofka waraysiga qaadaaya iyo adigu aad isku meel joogtaanba.

Caddaymaha dheeraadka ah u soo dir Hoggaanka Socdaalka waraysiga ka hor



Haddii aad waraysiga kahor haysato dukumintiyo la xiriira codsigaaga ama caddaymo adiga kugu saabsan, waxaad u soo dirtaa laanta magangalyoddoonka ee Hoggaanka Socdaalka ama qareenkaaga, wakhti fiican oo ka horreeya waraysiga. Haddii aadan ka soo gaarsiin karin oo waraysiga uusan wakhti dheer ka harin, hore u soo qaado marka aad waraysiga imaanayso.

Qaabkaan ayaad uga qaybqaadan kartaa waraysiga fiidiyoowga



Shaqaalaha Waaxda heynta kummeelgaarka ah ayaa ku siinaya waraaqda ballanka ee laguugu yeeraayo waraysiga iyo talo soojedinta ku saabsan waraysiga. Waraaqda laguugu yeeraayo waraysiga waxaa ku qoran, taariikhda waraysiga la qaadaayo.




Waxaad soo qaadataa kaarkaaga macmiilka. Shaaqalaha waaxda haynta kummeelgaarka ah ayaa kaa fiirinaaya kaarkaaga si uu kuu qaoonsado, kahor inta aan waraysiga la bilaabin.


Qof kasta oo ka mid ah dadka magangalyoddoonka ah wuxuu xaq u leeyahay waraysi isaga u gaar ah. Haddii tusaale ahaan aad Finland gudaheeda ku leedahay xaas iyo carruur, kama ay qayb qaadan karaan waraysigaaga kuu gaarka ah



Shaaqalaha waaxda haynta kummeelgaarka ah ayaa ku geynaaya qolka loogu talaggalay in waraysigu ka dhaco. Waxaana uu kuu sheegaayaa, qofka aad caawimaadda ka heli karto, haddii xilliga waraysiga ay soo baxaan wax cillado ah, tusaale ahaan dhan xiriirka fiidiyowga.



Annaga ayaa kugula soo xiriireyna fiidiyowga isla wakhtiga aan kuugu soo sheegnay waraaqda u yeerista. Waxaan kuu qabannay turjubaan, kaasoo turjumi doona dhammaanba waxa lagu wadahadlaayo. Turjubaankuna wuxu ku turjumi doonaa dhanka fiidiyowga.



Ugu dambayn waxaan dhanka fiidiyowga dib ugu noqonaynaa qoraalka laga qoray waraysiga gebi ahaantiisa ama qaar ka mid ah. Haddii qofka waraysiga qaadaaya uusan adiga kula hubin qoraalka laga qoray waraysiga gabi ahaantiisa, waxaa laguu qabanayaa wakhtiga kama dambaysta ah ee aad ku soo dirayso wixii sixitaan ama wax ku kordhin ah ee qoraalka laga sameeyay waraysiga la xiriira.